




# Ilaha Daryeelaha

Waalid kasta ama daryeele kasta waxa uu rajaynaya in hab-dhaqanka ubadkooda iyo doorashadooda ay xaqiijiyaan mustaqbal wanaagsan ee qoyskooda. Tani waxay noqon kartaa mid sida asxaabtooda ama xitaa dadka waaweyn ee aan wax wanaagsan la rabin ilmahaaga.

Inta lagu jiro qaan-gaarnimada, dhallinyaradu waxay bilaabaan inay raadiyaan madaxbannaani iyo tacabur. Waxay u heelan yihiin inay tijaabiyaan waxyaabo cusub, kalsooni badan ayay ku galaan khataraha, waxayna rabaan dareenka ka mid ahaanshaha iyo ixtiraamka asaagooda. Tani waxay ka dhigi kartaa inay u nuglaadaan saameynta xun, laakiin isla tamartaas ayaa sidoo kale loo gudbin karaa jihada wanaagsan.


Hagahan ayaa kaa caawin doona inaad garato calaamadaha laga yaabo in ilmahaagu uu ku dhex jiro dadka khaldan, wuxuuna kaa caawinayaa tillaabooyinka aad ku ilaalinayso ilmahaaga. Inaad ilmaahaaga siiso ku dayashada wanaagsan iyo waxqabadyo waxay u sahlaysaa mustaqbal wanaagsan oo caafimaad qaba.

**Haddii aad ka welwelsan tahay ilmahaaga ama qof kale oo dhallinyaro ah oo aad taqaan, caawimaad ayaa diyaar ah.**



**Bogga Internetka:**  
[edmonton.ca/buildingsafercommunities](https://edmonton.ca/buildingsafercommunities)

**Ilo Dheeraad Ah:**  
Wac: 211



## Taageerida Doorashooyiinka Wanaagsan ee Dhallinyarada

## U Dejinta Ilmahaaga Guul

Building Safer Communities



# Garo Calaamadaha

Haddii ilmahaagu ku dhibtoonayo dugsiga ama dhalinyarada kale, waxaa laga yaabaa inay dareemaan I ay ka xun yihiin in arrimuhu si fican u socon. Waxaa laga yaabaa inay isku dayaan inay qariyaan dhibaatooyinkooda si ay u badbaadiyaan sumcadaada oo ay uga fogaadaan inay ku niyad jabiyaan, laakiin tani waxay ka sii dari kartaa arrimaha mustaqbalka fog maadaama ay ka ilaalinayso inay helaan hagida ay u baahan yihiin si ay u xaliyaan dhibaataadaas. Waxa kale oo laga yaabaa inay taageero khaldan ka helaan kooxaha saaxiibadooda ah ee aan samaynayn doorashooyin wanaagsan.

Haddii aad aragto isbeddello lama filaan ah oo ku yimaadda hab-dhaqanka ilmahaaga, waxqabadka dugsiga, ama xidhiidhka labadiina niga dhexeeya – sida tusaalayaasha hoose ku xusab – waa muhiim inaad si toos ah ugala hadasho ilmahaaga noloshiisa.

## Dugsiga

- Hoos u dhac degdeg ah oo ku yimid buundooyinka/waxqabadka tacliinta
- Aan ku dhammaynaynin ama soo gudbinaynin casharka dugsiga waqtigii loogu talagalay
- Telefoon ama iimaylo joogto ah oo ka iminaya dugsiga oo ku saabsan ilmahaaga ka maqnaanshihiisa fasallada
- Telefoon ama iimaylo laga soo diro dugsiga oo ku saabsan ilmahaaga u xoogsheeganaya ama la dagaallama ardada kale

## Bulshada


- Isbeddel degdeg ah oo ku aaddan dabeecadda ilmahaaga ee dadka bulshada iyo goobaha bulshada
- Luminta xiisaha hawlaha caadiga ah ee bulshada (naadiyada, kooxaha dhalinyarada, tabaruceyaasha, iwm.)
- Ka qaybqaadashada dhacdooyinka bulshada/dhaqanka oo hoos u dhaca.

## Facooda

- Ka haridda saaxiibadoodii muddada dheereed.
- Si lama filaan ah ku biirida koox cusub oo saaxiibo ah
- Akhlaaq xumi ku wajahan asxaabta iyo dadka waaweyn
- La xiriirida asxaab ku lug leh dhaqamada bulshada ka soo horjeeda (tuugnimo, dhib, hanjabaad, rabshad, iwm.)

## Qoyska

- Ka fogaanshaha wada hadalka qoyska
- Aan rabin inay waqti ku qaadataan guriga ama xubnaha qoyska
- In la iska indho tiro bandowiyada, shaqooyinka guriga, ama mas'uuliyadaha kale ee qoyska
- Haysashada lacag aan la garanayn, dhar cusub ama alaab kale oo qaali ah
- Inay qariyaan sababaha ay kaga maqnaayeen guriga



# Maxaad Sameyn Kartaa

## Qorshee wakhtiga qoyska

Si qoys ah cunada kuwada cunna, qorshee safarada joogtada ah ee qoyska, ilaali dhaqanka qoyska, oo wakhti u yeel qoyskaaga si aad ugala hadasho xubin kasta qorshihisa, dareenkiisa, iyo waaya aragnimadiisa. Sii jawaab celin badan oo wanaagsan oo u sheeg cunugaada in uu ogaado in ka qeybgalka qoyska ay adiga muhiim kuu tahay.

## Deji rajooyin iyo xuduudo cad

Deji rajooyin cad sida marka ilmahaagu u baahan yahay inuu guriga joogo iyo inta jeer ee ay u baahan yihiin inay ku la soo xiriiraan marka ay banaanka ku maqan yihiin. Sharax cawaaqibka ka dhalan kara jebinta xeerarkan oo raac cawaaqib xumadaas haddii la jebiyo, adigoo well muujinaya jacaylka ilmahaaga.

## Bar ilmahaaga khataraha iyo mas'uuliyadda

Si furan kala hadal ilmahaaga cawaaqib xumada ka iman karta dabeecadaha khatarta ah sida dayacaadda shaqada dugsiga, isticmaalka maandooriyaha iyo khamriga, ama la saaxiibtinimada asxaabta kuwaas oo saamayn xun ku leh. Ka fogow xeeladaha cabsida, laakiin sharax sida samaynta doorashooyin halista ah hadda ay u xaddidi karto doorashadooda mustaqbalka una horseedi karto qoomameyn. U muuji daryeelka iyo ka werwerka mustaqbalkooda, ha ku caroon ama ha eedayn.

## Waqtigooda ku buuxi waxqabadyo wanaagsan

Ka qaybgeli ilmahaaga dhaqdhaqaaqyada bulsheed ee siinaya dareenka ka mid ahaanshaha iyo wax qabad marka laga soo tago arimaha guriga. Sida Ciyaaraha, barnaamijyada farshaxanka, naadiyada dugsiga ama kooxaha dhalinyarada ee diinta ama bulshada dhamaantood waa xulashooyin wanaagsan. U qoondee mas'uuliyado da'dooda ku habboon guriga dhexdiisa.

## Ka qaybqaado oo ku mashquul

Muhiimada sii nolosha ilmahaaga. U muuji taageerada hiwaayadaha iyo waxyaabaha ay xiiseeyaan, la kulan macalimiintooda, baro asxaabtooda iyo waalidka saaxiibadood, isha ku hay dhaqdhaqaaqooda onlaynka ah, oo la soco horumarka ay ka samaynayaan dugsiga. U dabaaldeg guulhoodii oo ka caawi inay helaan taageero ku habboon haddii ay la halgamayaan

